# Ka saar **baaritaan adag** marka aad dooranayso **alaabooyinka qurxinta ee ammaan badan**.

DEPARTMENT OF ECOLOGY
State of Washington

**ECY** 24-04-061SO
**Juun** 2026



# **Alaabooyinka qurxinta ee ammaan badan** waxay soo gaarayaan dukaamada iyo goobaha qurxinta **ee kuu dhow.**

Alaabooyinka qurxintu kama koobna oo keliya make-up; waxay sidoo kale ka mid yihiin inta badan alaabooyinka daryeelka shakhsiga ah sida shaambo, deodorant, iyo kareemka jirka.  Qaar ka mid ah kiimikooyinka ku jira alaabooyinka qurxinta ayaa lala xiriiriyay saameyn caafimaad oo waxyeello leh, sida kuwa halkan lagu muujiyay. Gobolka Washington, waxaan xaddideynaa isticmaalka kiimikooyinkan ee alaabooyinka qurxinta, si alaabooyinka aad maalin kasta isticmaasho ay uga sii ammaan badnaadaan.







| **Kiimiko** | **Phthalates** | **PFAS** | **Formaldehyde Methylene Glycol** |
|---|---|---|---|
| **Shaqada** | • Walax jilcisa balaastigga<br>• Dareere milmiye<br>• Udgoon<br>• Xoojiye midab | Shaqooyin kala duwan, oo ay ku jiraan:<br>• Daryeelka maqaarka iyo timaha<br>• Saameeya qaabka iyo isku-dhafka alaabta | • Walax ilaaliya<br>• Toosinta timaha<br>• Xabagta qurxinta |
| **Khataraha caafimaad** | Waxay carqaladayn kartaa hormoonnada waxayna waxyeello u geysan kartaa taranka iyo korriinka. Waxay sun u tahay noolaha biyaha ku nool. | Waxay sababi kartaa waxyeello taran iyo korriin, kansar, sun ku dhacda qanjirka thyroid-ka, iyo hoos u dhac difaaca jirka. | Waxay cuncun iyo xanaaq ku keeni kartaa maqaarka, indhaha, iyo habdhiska neefsashada. Waxay sababi kartaa xasaasiyad maqaarka ah, neef, dhaawac sambabada ah, iyo kansar. |
| **Meelaha laga heli karo** | Nadiifinta ciddiyaha, buufinta timaha, kareemada xiirashada kadib, nadiifiyeyaasha, iyo shaambooyada. | Isqurxin, buufinta timaha, kareemada, shaambo, kareemo, iyo budo. | Badeecadaha toosinta timaha, badeecooyinka daryeelka timaha, badeecooyinka daryeelka maqaarka, qurxinta iyo koolada indhaha |

*

Macluumaadkan waxaa laga soo ururiyay daraasado si guud loo heli karo oo ku saabsan maaddooyinka kiimikada ah ee laga helay noocyo gaar ah oo alaabooyin qurxin ah. Liiskani ma aha mid dhammaystiran, mana aha inuu si toos ah ugu dabaqo dhammaan alaabooyinka ku jira qayb kasta. Waxaa laga yaabaa inaad u baahato macluumaad dheeraad ah oo gaar u ah alaabta ama xog laga helo ilo kale si ay kaaga caawiso go'aannada shakhsiga ama xirfadeed.






| **Mercury** | **Triclosan** | **m- iyo o-Phenylenediamines** | **Lead** |
|---|---|---|---|
| • Walax ilaaliya<br>• Walax maqaarka iftiimisa | Walax ilaaliya | Ka caawisa helitaanka midabka la doonayo ee dheeha timaha | Wasakh ama walax sumayn karta |
| Waxay sun u tahay maskaxda iyo habdhiska dareemayaasha. Waxay dhaawici kartaa kelyaha iyo beerka. Waxay sababi kartaa xasaasiyad maqaarka ah. | Waxay carqaladayn kartaa hormoonnada, waxyeello u geysan kartaa korriinka carruurta, waxayna kordhin kartaa iska-caabbinta antibiyootigyada. Waxay sun u tahay noolaha biyaha ku nool. | Waxay sababi kartaa kansar, sun ku dhacda xubnaha jirka, iyo xasaasiyad maqaarka ah. Waxay sun u tahay noolaha biyaha ku nool. | Waxay sababi kartaa kansar, waxyeello taran, iyo dhaawac korriinka maskaxda carruurta. Waxay sun u tahay noolaha biyaha ku nool. |
| Alaabooyinka maqaarka iftiimiya, kuwa ka saara dhibcaha ama madoowga maqaarka, iyo qurxinta agagaarka indhaha. | Alaabta daryeelka maqaarka, udgoonka, qurxinta, alaabada timaha, iyo alaabada timaha laga saaro. | Dheeha timaha | Hooska indhaha, qalin-indhaha, blush, lipstick, iyo maaskarada dhoobada. |

# Yaree **la kulankaaga kiimikooyinka sunta ah** ee ku jira alaabooyinka qurxinta.

**Ka iibso alaabooyinka qurxinta Gobolka Washington.** Xeerkan Qurxinta ee aan Sunta lahayn (Toxic-Free Cosmetics Act, TFCA) wuxuu mamnuucayaa in kiimikooyin badan oo waxyeello leh loo isticmaalo alaabooyinka qurxinta ee lagu iibiyo ama lagu qaybiyo Washington.

**Raadi shahaadooyin ay bixiyeen hay'ado madax-bannaan,** sida Cradle-to-Cradle ama EPA Safer Choice. Shahaadadu waxay ka dhigan tahay in khabiir dib u eegay maaddooyinka ku jira alaabta.

**Weydii dukaamada iyo khubarada qurxinta** alaabooyinka ammaan badan ee waafaqsan TFCA.



Si aad u codsato habaynta Xeerka Naafada Mareykanka (Americans with Disabilities Act, ADA), kula xiriir Ecology talefoon ahaan lambarka 360-407-6700 ama iimaylka hwtrpubs@ecy.wa.gov, ama booqo ecology.wa.gov/accessibility. Adeegyada Dadka Laxaadka La' ama TTY la hadal 711 ama 877-833-6341.

Halkan iskaanka ka samee si aad wax badan u ogaato.

ecology.wa.gov/tfca